

XUQUUQDAADA IYO KA HORTAGGA BIILKA CAAFIMAADKA EE KADISKA AH

Marka aad hesho daryeelka degdega ah ama lagugu daweeyo wax ka baxsan shabakada adeeg bixiyaha ee gudah cisbitaalka ama xarunta qalliinka ambalaaska gudahiisa ah, waxa laga ilaalinayaa biilka kadiska ah ama haraaga biilka.

WAA MAXAY "BIILKA HARAAGA AH" (mararka qaarna loo yaqaana "Biilka kadiska ah")?

Markaad la kulanto dhakhtar ama bixiye kale oo daryeel caafimaad ah, waxaa laga yaabaa in lagugu yeesho kharash, sida lacag dheeri ah, ceymiska, iyo/ama lacaga laga jari karo. Waxaa laga yaabaa inaad leedahay kharashyo kale ama aad bixiso dhammaan biilka haddii aad aragto adeeg bixiye caafimaad ama aad booqato xarun daryeel caafimaad oo aan ku jirin shabakada qorshahaaga caafimaadka.

"Waxa shabakadda ka baxsan" waxay qeexaysaa bixiyeyaasha iyo xarumaha aan heshiiska la saxiixin qorshahaaga caafimaad. Adeeg bixiyeyaasha shabakadda ka baxsan ayaa laga yaabaa in loo ogolaado inay kugu soo dallacaan faraqiga u dhexeeya waxa qorshahaagu uu ogol yahay inuu bixiyo iyo dhamaan lacagta adeega lagugu soo dalacay. Tan waxaa loo yaqaana "**haraaga biilka.**" Lacagtani waxay u badan tahay inay ka badan tahay kharashyada shabakadda ee adeeggasi waxaana laga yaabaa inaan lagu tirin xadkaaga sannadlaha ah.

"**Biilka kadiska ah**" waa haraaga biil aan lama filaan ah. Tani waxay dhici kartaa marka aadan xakameyn karin cidda ku lugta leh daryeelkaaga - sida marka aad leedahay xaalad degdeg ah ama marka aad ballan ku sameyso booqasho xarun shabakadda ku jurta laakiin ay si lama filaan ah ku daaweeyaan adeeg bixiyeyaal ka baxsan shabakadda.

WAXAA LAGAAGA ILAALINAYAA BIILKA HARAAGA AH EE:

Adeegyada degdega ah

Haddii aad leedahay xaalad caafimaad oo degdeg ah oo aad ka hesho adeegyada degdegga ah bixiye ama xarun ka baxsan shabagadda, adeeg bixiyaha ama xarunta inta ugu badan waxa laga yaabaa inay kugu soo dallici karaan qaddarka kharash wadaagga shabakadda qorshahaaga (sida lacagta dheeriga ah iyo caymiska). Laguugu ma soo dallici karo kharashka adeegyadan degdegga ah. Tan waxa ku jira adeegyada aad heli karto ka dib marka aad xaalad degenaansho ku jirto, ilaa aad ka bixiso ogolaansho qoran oo aad ka tanaasusho ilaalinta ah in aan la isku dheeli tirin kharashka adeegyadan ka dambeeya xasiloona.



Adeegyada qaarkood ee cisbitaalka ku jura shabakadda ama xarunta qalliinka ee ambalaaska

Markaad adeegyo ka hesho cisbitaalka ku jura shabakadda ama xarunta qalliinka ambalaaska ah, adeeg bixiyayaasha qaarkood waxa laga yaabaa inay ku jurin shabakadu. Markaan oo kale, inta badan adeeg bixiyayaasha ayaa laga yaabaa inay kugu soo dallacaan qaddarka kharash wadaagga ee shabakadda qorshahaaga. Tani waxaa ka mid ah daawada degdega ah, suuxinta, pathology-ga, radiology-ga, shaybaadhka, neonatology-ga, kalkaaliyaha dhakhtarka qalliinka, dhakhtarka, ama adeegyada degdegga ah. Adeeg bixiyayaashani kuuma soo gudbini karaan haraaga biilka waxaana laga yaabaa inay ku weydiini karin inaad ka tanaasusho ilaalintaada ah in aan lagu soo gudbini karin haraaga biilka.

Haddii aad ka hesho adeegyo kale xarumahan ku jura shabakadda, adeeg bixiyayaasha ka baxsan shabakadda kuuma soo gudbini karaan haraaga biilka, ilaa aad ka bixiso ogolaansho qoraal ah oo aad ka tanaasusho ilaalintaada.

Loo ma baahno inaad waliga ka tanaasushid ilaalintaada ah haraaga biilka. Sidoo kalena loo ma baahno inaad adeeg ka heshid goob ka baxsan shabakadda. Waxaad xulani kartaa adeeg bixiye ama xarun ku jurta shabakadda qorshahaada.

MARKII AAN LA OGGELIN HARAAGA BIILKA, WAXAAD KALE OO AAD LEEDAHAY ILAALINTA SOO SOCDA:

- » Waxaad mas'uul ka tahay oo kaliya bixinta qaybtaada kharashka (sida kharashka dheeriga ah, caymiska, iyo lacagaha laga jarayo ee aad bixin lahayd haddii adeeg bixiyaha ama xarunta ay ku jirto shabakadda). Qorshahaaga caafimaad wuxuu si toos ah u siini doonaa adeeg bixiyayaasha iyo xarumaha ka baxsan shabakada.
- » Qorshahaaga caafimaad waa inuu guud ahaan:
 - » Bixiya adeegyada degdegga ah adigoon u baahnayn inaad oggolaansho hore aad u hesho adeegyada (ogolaansho hore).
 - » Bixiya adeegyada deg-degga ah ee adeeg bixiyayaasha ka baxsan shabakadda.
 - » Ku salee wuxuu kugu leeyahay adeeg bixiyaha ama xarunta (kharash-wadaaga) waxa ay sinayaan Adeeg bixiyaha ama xarumaha ku jura shabakada oo tusii sharaxaadaada dheefaha.
 - » Tiri qiyaas kasta oo aad ku bixiso adeegyada degdegga ah ama adeegyada shabakadaha ka baxsan ee lacagta laga jaraayo iyo xadka ka baxsan jeebka.

Hadaad aaminsan tahay in si khalad ah biil laguugu dalacay, waad la ka la soo xiriiri kartaa xafiskeen ganacsi: **(651) 968-5050**. Booqo www.cms.gov/nosurprises wixi maclumaad oo dheeri ah oo ku saabsan xuquuqdaada ee xeerka federaalka.

waxaad boqani kartaa www.ag.state.mn.us/consumer/health/default.asp f wixi maclumaad dheeri ah oo ku saabsan xuquuqdaada ee xeerka Minnesota.

